

2021 Baraha Intarnetka ee Wabarshada Xagaaga

Waa baro intarnetka ah oo ay waalidka iyo dadku ka helayaan macluumaadyada waxbarashada xagaaga.

Macluumaadka Qoyska iyo Dadweynaha

Ka raadso barnaamijyada Dugsiyada Dadweynaha ee Denver (DPS), macluumaadyo, iyo caawimaadda qoysaska. Hoggaanka Macluumaadka Xagaaga ee 2021, waa hoggaan ku saleysan waxyaabo ay DPS ka maqashay dadweynaha baahidooda, oo waxaa laga heli karaa halkan.

<https://equity.dpsk12.org/family-resources>

Hawlgelinta Qoyska iyo Dadweynaha (FACE)

Barnaamijka FACE waa tasiilaad, macluumaadyo, waxbarasho iyo caawimaad loo hayo ardeyda DPS oo dhan mar ay noqotaba inta ay iskuulka dhigtaan, oo waxaa lagu caawinayaa 93,000 oo ah ardeyda degmada oo dhan iyo qoysaskooda.

<https://equity.dpsk12.org/family-and-community-engagement>

Helidda Barnaamijka Dhallinyarada ee Magaalada Denver

Ka faa'iideyso Helidda Barnaamijka Dhallinyarada ee Denver adiga oo ka baaranaya barnaamijyo intarnetka ah iyo kuwa si caadi ah loo kulmayo oo ilmaha u horseedi doona badqabid, firfircoonaan lagu arkayo ka hor ama ka dib xilliga iskuulka, fasaxyada nasashada ah ee iskuulka, iyo xitaa sabsiyada iyo axadaha.

<https://www.denvergov.org/youthprogramlocator>

Barnaamijka Adeegga Cuntada Xagaaga

Barnaamijka Adeegga Cuntada Xagaaga waa quraac bilaash ah, qado, cunto fudud, iyo casho loo hayo dhallinyarada ku nool Colorado xilliga xagaaga oo dhan. Qof kasta oo gaaray 18 sano ama ka yar ayaa lagu soo dhaweynayaa in uu wax ka cuno goobaha cuntada xilliga xagaaga oo dhan.

<https://www.cde.state.co.us/nutrition/summerfoodserviceprogram>